



Maxaa dhici doonaa hadda, waa tan codsigaaga magangalyada la soo diidaye?

IND ayaa ku ogaysiisay in Nederlaan lagaa siin doonin magangalyo. Waannu kuu fahamsanahay in ay tani niyad-jab tahay. Waa hawl noo taala inaannu si taxadar leh kuugu diyaarinno ka bixida Nederlaan. Sida aannu tan u sameyn lahayn waxay ku xidhan tahay in go'aanka celitaanka aad haysatid iyo in kale.

Labada xaaladoodba, wada shaqeyntiinu waa muhiim.



Weli ma haysatid go'aan celitaan
Wadajirayaannu u raadin doonaa in ehel amba dad aad taqaanid ay jiraan oo loo degi karto. Tani may suurtogeli wayday? Markaas waxaannu raadin doonaa hoy. Baadhitaankan wuxuu qaadan karaa 1 sanno. Waxaa jira 3 natijjooyin oo kala duwan oo suurtogal ah.




Waxaa laguu siiyay go'aanka celitaanka
Waa inaad Nederlaan ka baxdo. Waxaan ku wada hadli doonaa macnaha tani ay adiga ku leedahay iyo cidda ku daryeeli karta. Waxaa jira 3 natijjooyin oo kala duwan oo suurtogal ah.



1 Waxaannu helnay hoy ku habboon
Haddii aannu helno hoy ku habboon, waxaa weli laguu siin doonaa go'aanka celitaanka.
Midig eeg




1 Waad nala shaqaysay iyo waad noqonaysaa
Wadajirayaannu ballammo ka dhiganaynaa ehelkaaga, dadka aad taqaanid amba hoyga. Haddii loo baahdo, waxaannu ku soo dhammeyn doonaa dokumentiga ku dhoofi lahayd. Hage/Caawiye ayaa kuu geyn doona cidda ku daryeeli doonta.




2 Waad nala shaqaysay, balse maannu kuu helin hoy
Ma marwalba ayaa kala shaqaysay baadhitaanka hoyga? Balse sida ahaatee maannu kuu heli waynay meel fiican? Markaa waxaannu u gudbin doonaa IND. IND waxay markaas go'aansan kartaa inaad Nederlaan sii joogi karto.



2 Waad nala shaqaysay, balse ma bixi kartid
Miyay xitaa la shaqayntaadu suurtogelin wayday inaad baxdo? Markaa waxaannu u gudbin doonaa IND. IND waxay markaas go'aansan kartaa inaad Nederlaan sii joogi karto.



3 In nagu filan nala maad shaqeyn, iyo maannu kuu helin hoy
Ma wax walba ayaa noo sheegi wayday amba daacad baad wada ahayn? IND waxay markaas naga codsan kartaa inaannu baadhitaan sii samayno. Miyaannu weli kuu heli waynay hoy? Kadib markaad 18 jirsato, joogitaankaaga Nederlaan waa sharci darro. Markaa xaq uma lihid hoy iyo waxbarasho. Waxaa lagugu qasbo karaa inaad Nederlaan ka tagto.



3 In nagu filan nala maad shaqeyn, iyo way suurtogeli wayday ina ballammo fiican wada dhiganno
Ma wax walba ayaa noo sheegi wayday amba daacad baad wada ahayn? Markaa way yaraynaysaa inaannu si fiican ku caawinno. May suurtogeli wayday inaad baxdo? Kadib markaad 18 jirsato, joogitaankaaga Nederlaan waa sharci darro. Markaa xaq uma lihid hoy iyo waxbarasho. Waxaa lagugu qasbo karaa inaad Nederlaan ka tagto.